WORLD BANK GROUP

Qoraal loo adeegsanayo shirka

Nidaamka Maaliyadeed ee Shidaalka Dalalka soo Koraya

Waxa qoray Charles P. McPherson

“Aqoon kobcin ku saabsan Maamulka Khayraadka Shidaaalka”

Nidaamka Maaliyadeed ee Shidaalka Dalalka soo Koraya

Waxa diyaariyay Charles P. McPherson

Qoraalkan waxa loo diyaaray Heshiiska Bangiga Aduunka ee loogu talo galay Dawladda Soomaaliya kaas oo qayb ka ah gogol xaadh balaadhan oo lagu lafo gurayo arimo muhiim ah oo la xidhiidha horumarinta iyo maamulka waaxda shidaalka.

Qaybaha Qoraalka

I. Hordhac……..1

II. Astaamaha Gaarka ah ee Sahaminta iyo Qodaalka shidaalka…….2

III. Ujeedooyinka Nidaamyada Maaliyadda…….3

IV. Hababka Maaliyadda ……..……..7

V. Bushqadda Maaliyadda ……..……17

VI. Qiimaynta Nidaamka Maaliyadda ……...18

VII. Qodobo maaliyadeed oo gaar ah…….....20

VIII. Soo koobid iyo Gunaanad……..….24

Tixraacyo iyo akhris kale oo talo lagugu siinayo ……...….25

I. Hordhac

Qorshaha iyo wax-tarka nidaamyada maaliyaddu waxay xiiso galiyaan murranna ka dhex aloosaan Siyaasiyiinta iyo xirfadlayaasha in ka badan inta dhinacyada kale ee nidaamyada sharciga iyo heshiisyada hawlaha shidaalku ay soo jiitaan.

Inta aynaan si gaar ah u fiirin tafaasiisha nidaamyada maaliyadda ee shidaalka, qaybtan hada soo socota waxa lagu ogaanayaa astaamo badan oo ay leedahay waaxda shidaalku, kuwaas oo saamayn ku leh qorshaha maaliyada. Qaybta III waxa lagu fiirin doonaa ujeedooyinka uu leeyahay nidaam kasta oo maaliyadeed oo saliida iyo gaasta khuseeya, kaas oo lagu qiimeyn karo waxtarkooda. Qaybta IV waxa ay taxaysaa hababka kala duwan ee lagu gaari karo ujeedooyinka maaliyadda waxana lagu falanqayn doonaa dhibta iyo dheeftooda. Qaybta V waxa lagu fiirinayaa sida dalalku ay habab maaliyadood oo kala duwan iskugu keeneen hal meel (bushqad) si loo gaaro ujeedooyin maaliyadeed oo kala gadisan. Qaybta VI waxa ay hoosta ka xariiqysaa ahamiyadda ay leedahay qiimaynta dhaqaaluhu ee nidaamyada maaliyadda ee hore u sii jiray iyo kuwa soo socda ee la qorshaynayo waxana ay soo bandhigaysaa halbeegyada(parameters) iyo dariiqyada la adeegsado si loo hirgaliyo qiimayntaasi. Qaybta VI waxa lagu soo xulayaa tiro qodobo ah oo maaliyadda ku saabsan oo muhiim ah si tixgalin balaadhan loo siiyo. Qaybta ugu dambaysa waxa lgu soo koobayaa qodobada iyo fikirada ugu muhiimsan.

Qoraalku waxa uu khuseeyaa kaliya hawlaha qulqulka hawlaha shidaalka ee *marxaladda hore*, ee ay ka mid yihiin, sahaminta la xiriirta daahfurka/helitaanka saliidda iyo gaasta, horumarka ganacsigiisa iyo iibkiisa, laakiin ma khuseeyo hawlaha sufaynta iyo suuqayntiisa. Qoraalka dhamaantii, kalmadda “maaliyad” waxa loo isticmaali doonaa arimo ay ka mid yihiin dhamaan noocyada cashuuraha hawlaha shidaalka, kuwaas oo ka imanaya sharci ama heshiiyo qandaraas.

II Astaamaha Gaarka ah ee Sahaminta iyo Qodaalka Waaxda shidaalka

Qaybtan koobani waxay kasii hadlaysaa waxa qaybta III iyo IV ay ka hadli doonaan iyada oo tilmaamaysa astaamaha gaarka ah ee waaxda shidaalku leedahay ee la rajaynayo in ay saamayn ku yeelato ujeedooyinka iyo xulashada hababka maaliyadda.

Xiliyada Sahanku waa mid Fogaansho iyo kharash badan*.* Sahaminta shidaalka, gaar ahaan meelaha xuduudaha iyo goobaha aan wax laga soo saarin, waxa ay qaataan waqti dheer ilaa inta maalgaliyuh ogaanayo in khayraad ganacsi gali karaa ku jiro iyo in kale. Sahamintu way kharash badan tahay, duruufaha qaarkoodna xad dhaaf ayuu kharashkeedu u sareeyaa. Tani waxa ay saamayn ku leedahay, qorshaynta maaliyadda. Marka la helo shidaal, maalgaliyayaashu waxa ay rabaan in ay arkaan macaash dagdag ah oo ku filan si ay magdhaw ugu helaan wakhtiga dheer ee ay sugayeen "ee kharashka badnaa" ilaa intay gaarayeen. In la filo macaashkaasi iyo in kale waxa ay muhiim u tahay soo jiidashada maalgaliye daneeya marka ugu horaysaba waxana ay si wayn ugu tiirsanaan doontaa qayb ahaan nidaamka maaliyadda.

Soosaaridda shidaalka Hanti badan oo xad dhaaf ah ayaa ku baxda*. Kharayshaadka faraha badan ee soosaaridda shidaalku waxa ay abuurtaa cadaadis dheeraad ah oo ku yimaadda maalgaliyayaasha marka ay qorsheeyaan nidaam maaliyadeed oo ay ka heli karaan macaash dagdaga oo ku haboon.* Dawladuhu waxa laga yaabaa in ay garawsadaan warwarka maalgaliyaha, laakiin ma rabaan heshiis maaliyadeed oo siinaya maalgaliyaha macaash dagdaga oo si xad dhaaf ahna u daahinaya dakhliga dawladdu ay helayso.

Maalgashiga shidaalku waa mid aan laga guuri karin. Hawlgaladda lagu daahfurayo shidaalka iyo mashaariicda soosaaridda shidaalku midna inta ay meel ka guuraan meel kale uma wareegi karaan. Maalgaliyayaasha waxa laga yaabaa in ay ka walwalaan in dawladuhu ay go'aansadaan in ay badalaan heshiiska maaliyadeed kuna badalaan mid iyaga u dan ah, iyaga oo ogsoon dabciga ma-guuraanka ah ee maalgashiga saliidda iyo gaasta kadib marka ay arkaan in ganacsi uu noqon karo shidaalku ee laguna guulaysto in la soo saaro. Hadaba, cadaadiskaa dartii, maalgaliyayaashu waxa ay raadinayaan heshiis maaliyadeed oo u ogolaanaya in ay hore uga soo kabtaan kharashaadkii ay galeen macaashna ay dagdag u helaan.

Halis wayn ayaa ka iman karta deegaanka, horumarka iyo siyaasadda*. Hawlaha sahaminta iyo soosaaridda shidaalka waxa la socda halis badan.. khatarta ku jirta in la helo saliid ama/iyo gaas, khatarta farsamo ee ka imaan karta* saamaynta uu yeesho daahfurka shidaalku, khatar ka imanaysa dib-u-dhac aan la filayn, iyo khatarta ku lifaaqan kharashku hadii uu fara bata. Waxa laga filayaa in maalgaliyayaashu ay khatartaas dusha u ritaan laakiin iyaguna waxa ay rajaynayaan in ay heli doonaan badalkeeda abaal marin maaliyadeed. Khatar siyaasadeed, - oo ah halista ka iman karta kacdoon siyaasaded, in dawladdu kaligeed dib wax ugu badasho heshiiska maaliyadeed, iwm. – waxa laga yaabaa in ay caqabad ku soo kordhiso maalgaliyayaasha aritaasi, taas iyaguna badalkeeda waxa ay rabaan in ay kaga bogsadaan abaal marin ay ka helaan dalka martida loo yahay. Kuwaasi waa khatar iman karta, hase yeeshee, waxa suura gal ah in dawladda marti galinta leh in ay awood u leedahay in ay yarayn karato khatartaas. Kolba waa sida ay dawladdu ugu guulaysatee, waxa laga yaabaa in shuruudaha loo soo bandhigo maalgaliyayaashu ay noqdaan shuruudo iyaga culays ku ah oo dawladda uun u danaynaya.

Qiimayaasha shidaalku aad ayay isku badalaan*. Qiimayaasha shidaalku meel ma taagna, lama hubo oo way isbadalaan, saamayn wayna way ku leeyihiin qoryaasha maaliyaddadawladdu waxa ay rabtaa in ay qaadato saamiga ugu wayn haddii uu kordho dahliga qiimayaasha ka soo qala, xaga ay maalgaliyayaashuna ay rabaan in* ay ilaashadaan macaashkooda marka qiimayaashu hoos u dhacaan.

Tayo, alaab, iyo qiime is badala/doorsooma ayuu leeyahay shidaalku. *Saliidda cayriin waxay leedahay tayo kala duwan*– waxa kala duwan cufnaanteeda, inta salfar ku jirta, duxdeeda, iyo goobtu inta ay u jirto suuqa. Halgallada saliidda cayriin waxa ay kaga duwan yihiin gaaskta dhinacyo badan – waqtiga ka tagaya in loo sameeyo suuqayn ganacsi, macaashku inta u yahay, habka iyo qalabka loo baahan yahay. Waa in faraqaasi la fahmaa marka la sharaxayo nidaam kasta oo maliyadeed oo shidaalku yeelanayo.

Khayraadka shidaalku wuu duugoobaa*.* Khayraadka shidaalka ee la hubo in uu yaraanayo ugu dambayntana dhamaanayo ayaa waxa uu la imaanayaa su'aalo maaliyadeed. Hal mid oo ka mid ah waxa ay

tahay, halbeegga kharashka ayaa kor u kacaya kadibna macaashka ayaa hoos u dhacaya marka wax sosaarku yaraado. Heshiisyada maaliyaddu waa in ay la jaanqaadaan duruufaha isbadalaya hadii la rabo in lagu dhiirado sii wadida soosaaritaanka.

Warwarga/Tixgalinta ayaa ka jira Deegaanka*.* Kharashaadka lagu ilaalinayo deegaanka marka ay socdaan hawlgallada shidaalka ayaa muhiim ah si dib loogu dayac-tiro deegaanka kadib marka hawlgalku dhamaado. Nidaamka maaliyaddu waa in uu magdhaw ka bixyaa kharashaadkaas. Tani waxa ay keenaysaa caqabad gaar ah marka laga hadlayo kharashaadka la xidhiidha joojinta hawlaha soosaaridda, waayo xiligaas waxa aan jirin oo joogsanaya dakhligii lagu dabooli lahaa kharashkaasi.

Siyaasad la wada ogyahay*. Dakhliga faraha badan* (oo dhab ah ama mid la filayo) ayaa sii kordhinaya khatarta ka iman karta faragalinta dadwaynaha iyo siyaasiyiinta taas oo saamayn ku keenaysa qorshaha maaliyadda ee shidaalka.

III. Ujeedooyinka Nidaamka Maaliyadda

Qaabaynta, qiimaynta ama dib-u-habaynta nidaamka maaliyadeed ee gaasta iyo saliiddu waa in uu ku bilaabmo wada-hadal, oo sida ugu wanaagsan u dhex mara daneeyayaal badan, kaas oo ku saabsan natiijada iyo waxa ka soo baxaya nidaamka la rabo, tusaale ahaan, ujeedooyinka nidaamkaasi. Liiskan soo socda ma aha mid ay wax kastaa ku jiraan, laakiin waxa laga helayaa ujeedooyinka inta badan ay xusaan siyaasad-dajiyayaashu (siyaasiyiintu):

Wax-soo-saar wanaagsan iyo horumarin sal ballaadhan*. Sida ugu dhawaanshaha badan, nidaamyada maaliyaddu waa in ay u dhiiri galiyaan maalgaliyayaasha si ay wax uga soo saaraan ceel ama kayd ilaa inta ay gaarsiinayaan heer "dhamaan" kharashka halka xabo uu la mid noqonayo qiimaha halka xabbo inta la siinayo. Dhamaan kharashaadka oo isku duuban waxa ku jira kharashaadka tooska ah ee baxa iyo waliba "kharashaadka dibadda" ka imaanaya sida kharashaadka laga yaabo in ilaalinta deeganku keenaan, iyo waliba inta ugu yar ee maalgaliyuhu uu* macaash ka rabo raasamaalkiisii. Macnaha laga wado maalgashi wanaagsan marka ceelka la qodayo la dul joogo waxa lagu muujiyay **Jaantuska 1** ee hoos ku xusan. Xariiqda joogga utaalla waxa ay cabiraysaa halbeegga kharashka ama/iyo qiimaha; xariiqda jiiftana waxa ay cabiraysaa, wax-soosaarka. Xariijinta buluugga ah waxa ay ina tusaysaa in halbeegga kharashku uu la kordhayo wax-soo-saarka; xariiqda jiiftana waxa ay ina tusinaysaa heerka qiimaha suuqu uu kolba marayo. Qiimuhu waxa uu ugu wanaagsan yahay marka uu heerkiisu marayo Q*, marka qiimuhu uu daboolayo kharashka. Sida ugu fiican waa in nidaamka maaliyaddu uu dhiiri galiyo in wax-soo-saarka la gaarsiiyo ilaa heerka Q*.

Dooddaas oo kale ayaa lagu doodi karaa marka uu heerkaas oo kale joogo waaxda shidaalku guud ahaan. Hor-u-marka balaaran hadii la rabo waa in lagu xisaabtamaa dajinta dhamaan mashaariicda hadda jira iyo kuwa suurogalka ahba kuwaas oo kharashka hal xabbo oo kasta la daboolayo ama qiimuhu kharashka in ka badan uu noqonayo mudada fog. Fiiri **Jaantuska 2.** Mashruuca A ilaa E dhamaan way dabaqayaan shuruudaha waana in



nidaamka maaliyaddu dhiiri galiyaa. Waa mashaariic suura gal ah cashuurta ka hor oo ay tahay sida la rabo in ay sii shaqayn karaan cashuurta kadibna. Mashruuca D ma dabaqayo shuruudaha. Ma aha mid shaqayn kara cashuurta ka hor.



waana in uu ahaada mid aan sii shaqyn doonin cashuurta kadibna.

Natiijooyinka maaliyadeed ee lagu xusay halkan marka heer ceel qudha laga hadlayo (Jaantuska 1) iyo marka dhamaan waaxda shidaalka (Jaantuska 2) laga hadlayo waxa guud ahaan loo yaqaanaa kuwo bulsho ahaan aad u tayo-sareeya. Hadii wax walba sidiisa ahaado, nidaamka maaliyadda waa in loo qorsheeyo sida ay khalkhalka/isbadalka ugu yar ay ugu keeni karaan natiijada la rabo.

Habka korodhka ah ee ay dawladdu kirada ku soo xerayso. Inta u dhaxaysa kharashka iyo qiimaha/bayca ee Jaantuska1 iyo 2 waxa ay u taagan tahay kirada – waa dakhliga inta dheeraadka ah ee ka soo harta inta loo baahan yahay in lagu daboolo kharashaadka ay ka mid yihiin macaashka ugu yare ee uu maalgaliyuhu doonayo. Kiraddu waa inta ay wadaagayaan dawladda iyo maalgaliyuhu. Ujeeddo wayn oo ay leedahay dawladdu waa in ay soo xerayso kirada ugu badan ee suuro galka ah, kadibna ay qaadato saami kordhaya marka ay kolba kiradu sii korodho. Nidaamka maaliyadda ee habkan lagu gaarayo waxa loo yaqaanaa “habka korodhka”; nidaamka soo saaraya taa ka soo hor-jeedkeeda ama aan korodh lahayn waxa loo yaqaan “habka dib-u-socodka”. Labadan hab ee isku lidiga ah natiijadoodu waxa lagu xusay **Jaantuska III.** Saamiga dawladdu kirada ay ka hesho, waxa loo yaqaan “qaybta” ay qaadanayso oo waxa lagu qiyaasayaa xariiqda

joogga u taala; macaashka mashruuca ee ka horeeya qaybta ayaa lagu cabirayaa xariiqda jiifta, ee u koraysa dhanka midig.



Xariiqda buluugga ah ee kor u baxaysa waxay u taagan tahay nidaamka maaliyadda ee koboca; Xariiqda dhicdhibicda ah ee madawga ahna waa habka dib-u-socodka. Janjeerka xariiqda ee nidaam kasta oo maaliyadeed waxa uu ku xirnaanayaa isku darka hababka maaliyadda uu ka samaynsan yahay, iyo astaanta koboca ama dib-u-socodka ee qayb kasta oo habka ka tirsan.

Xadididda/yaraynta kharashaadka. Markasta oo la yareeyo kharashka, baaxadda qaybta ay wadaagayaan dawladda iyo maalgaliyuhu way sii balaaranaysaa. Sidaa daraadeed nidaamka maaliyaddu waa in uu dhiirigaliyaa in laga warqabo sidii loo yarayn lahaa kharashaadka.

Dakhli dagdag ah. Hore ayaynu u soo sheegnayn in uu maalgaliyuhu daneeyo dakhliga in uu dhakhso u helo. Dawladuhuna way la qabaan danahaas oo kale, gaar ahaan dalalka dadhligoodu hooseeyo ee soo koraya dalalkaas oo ay dagdag tahay baahida loo qabo lacag lagu yareeyo saboolnimada oo sidoo kalena wax lagaga qabto lacag yaraanta haysata kaabayaasha bulshada iyo dhismaha. Dalalka soosaaridda shidaalku uu hadda uun bilowga yahay, in la mudeeyo dakhliga kasoo baxayaa waxa ay si wayn ugu xidhan tahay tafaasiisha heshiiska maaliyadeed.

Dakhli la isku halayn/kalsoonaan karo. Dawladuhu waxa ay daneeyaan dakhliga lagu kalsoonaan karo. Waxa laga yaabaa in aanay suuro gal ahayn in la filo dakhli si joogto ah u soo baxa, laakiin waxa ay rabaan in ay dakhliga waxoogaa ah si uun u helaan duruuf kastaaba ha jirto eh gaar ahaan marka ay bilaabanto in shidaalka hab ganacsi ah loo soo saaro.

Maaraynta Khataraha. Khataraha ka imaan kara dhismaha dhulka, dhanka farsamada, iyo siyaasadda, iyo saamaynta ay ku leeyihiin xaddiga dhiirigalinta maaliyadda ah ee la siiyo maalgaliyayaasha iyo faa'iidada la is barbar dhigayo ee ay kala helayaan maalgaliyuha iyo dawladdu si ay u maareeyaan ayaa kor lagu soo sheegay. Khatar kale oo in la maareeyo u baahan waxa ay tahay isbad-badalka ku yimaadda dakhliga. Waxa lagu doodi karaa maadaama oo isku darka tirada mashaariicda ah ee uu wado maalgaliyuhu ay aad u kala duwan yihiin, marka la barbar dhigo dal cusub oo hadda shidaal soo saaraya, maalgaliyuhu wuu aqbali karaa khatartaasi. Laakiin dhab ahaan cadaadiska miisaaniyadda iyo kan siyaasadeed ee ku saaran dawladda martigalinta leh in ay qabtaan/xereyan faa'iidada dakhliga xiliyada isbadalada korukaca iyo hoos-u-dhaca dhaqaale ayaa badanka ku kalifta in ay aqbalaan in badan oo ka mid ah khataraha ay keenaan isbadallada ku imanaya dakhligu.

In uu u tartami karo si caalami ah. *Mashaariicda shidaalka waxa laga yaabaa in ay noqdaan kuwo aan la riixi/badali karin marka la sameeyo, laakiin ka hor intaas lacagta raasamaalka ah ee wax lagaga qabanayo ayaa ah mid aad u socod badan, taas oo ka dhex abuuraysa tartan dalalkii hore shidaalka u soo saari jiray iyo kuwa ay suuragalka tahay in ay soo saaraan si ay u helaan raasamaal/lacag.* Tartankaas waxa go'aamiya

oo xudun u ah kaydka dhulku intuu yahay iyo qaabka nidaamka maaliyadda ee dalka soosaaritaanka laga samaynayo. **Jaantuska 4** waxa uu bixinayaa tusaale ah isbarbardhiga laga yaabo ay samayso shirkadda maalgashiga samaynaysaa marka ay go'aan ka gaarayso meesha ay lacagta gashanayso. Waxa laga yaabaa in isbarbardhig la mid ahan uu sameeyo dalka martigalinta lihi marka uu go'aaminayo in ay tahay maalgalintu mid aad u qaali ah ama mid aad u hoosaysa marka loo barbar dhigo dalalka kale ee raadinaya maalgashi la mid ah. Xariiqda joogta waxa ay ina tusinaysaa xaddiga celceliska cashuurta la qaado oo lagu dabaqay horumarinta/qodidda ceel saliideed oo mala-awaal ah halkaas oo dalal la soo xushayna lagu taxay xariiqda jiifta.

Figure 4
International Competitiveness (Oil)
Selected Countries



13

Fududaanshaha maamulka. Awoodda hay'adeed ee tamarta daran ee dalal badan haysta ayaa ah dhibtaato, taas oo haysata badanka dalalka soo koraya. Waxa dhib intaa kasii daran noqon kara maamulka nidaamka maaliyadeed ee shidaalka, taas oo ku kalifta in ay dalal badani jeclaystaan in ay qorsheeyaan nidaam maaliyadeed oo fudud oo ay meeshana ka saaraan hab casri ah in ay ku dhaqmaan. Hase yeshee, nidaamka maaliyadeed ee fudud isna dhibkiisuu leeyahay. Waxa laga yaabaa in ay khalkhal ku ridaan dhiirigalinta/abaal marinta ama/oo ay ku guul daraystaan in ay u shaqeeyaan sidii laga filayay marka ay duruufuhu is badalaan, taas oo horseedda in ay dawladda iyo maalgaliyayaashu isku dhacaan oo sidoo kalana cadaadis uu yimaaddo kalifa in dib looga wada xaajoodo heshiiskii hore.

IV. Hababka Maaliyadda

Ujeedooyin maaliyadeed oo badani waxa ay keenayaan habab maaliyadeed oo kala duwan, kaas oo mid kasta oo kamid ahi uu leeyahay astaan u gaar ah, iyo faa'iido iyo khasaare labadaba, uu u leeyahay nidaamka maaliyadda guud. Qaybtan waxa lagu fiirinayaa hababka maaliyadda ee lagu dabaqo badanka hawlgallada shidaalka waxana la qiyaasi doonaa mudnaanta iyo dhaliisha mid walba uu leeyahay marka la barbar dhigo ujeedooyinka lagu xusay qabta III.

Cashuurta Macaashka. Cashuuraha macaashka waxa ka mid ah cashuuraha inta badan la adeegsado ee cashuuraha dakhliga shirkadaha iyo dadka oo si gaar ah loogu dabaqay shidaalka, iyo cashuur kale oo si gaar ah looga qaado macaashka. Waxa lagu cabiraa boqolkiiba inta ay ka tahay dakhliga kadibana waxa laga jaraa kharashaadka. Cashuuraha macaashku waxa ay u dhexeeyaan badanka boqolkiiba 35 ilaa 50.

Faa'iidada ugu waynee laga rabo cashuuraha macaashku waa in ay xaqiidii leeyihiin samaaynta ugu yar ee khalkhal galin garta go'aan gaaridda maalgaliyaha, marka laga hadlayo ceel qura ama waxsoosaarka waaxda shidaalka oo dhan. Go'aamada waxsoosaarka ama maalgashiga ee suuro-galka ah ee soo-jiita maalgaliyaha cashuurta ka hor ayaa noqda kuwo sax ah oo shaqaynaya cashuurta ka dibna. Sababtu waxa ay tahay cashuurta marka horaba waxa laga qaadaa boqolkii in ka mid ah waxa soo baxa, cashuurta ka hor hadii macaash ama ay kiro soo baxdo kharashka ka badani, taas oo mar walba qaybtiisa maalgaliyahu uu ka helayo. Qodobkan waxa lagu muujiyay **Jaantusyada 5** iyo **6** kuwaas oo ku sii darsamaya wixii ku xusnaa Jaantuska 1 iyo 2 cashuur macaash oo mala-awaal ah.



Qaybta la hadheeyay jaantus walba – waa goobta u dhaxaysa qiimaha iyo kharashka– waxay u taagan tahay macaashka iyo dakhliga kirada ka soo baxa. Hadhka hoose waxa uu u taagan yahay cashuurta macaashka. Ilaa marka uu joogsanayo dakhliga faa'iidada ah, maalgaliyuhu mar walba haddii uu ka helayo qaybtiisa wixii faa'iido dakhli ah ee soo baxa, waxa uu jeclaysan doonaa in uu sii wado soosaaritaanka ilaa la gaarayo meesha ugu saraysa ee, Q*, Jaantuska 5, iyo in uu sii raadiyo horumarinta mashriiciisa taas oo ay ku jirto E Jaantuska 6 dhexdiisa.



Cashuuraha macaashku waxa kasoo baxa natiijo kala duwan marka lagu qiyaaso ujeedooyinka maaliyadda:

Haddii aan la badbadalin, tusaale ahaan., in la soo jeediyo qiyaaso xadi cashuureed oo kala duwan, ma ah koboc. Boqolkiiba inta ay ka qaadan macaashka iyo kiradu waa in isku mid ah mar walba – ma korodho marka macaashku kordho.

Waxa ay dhiiri galiyaan in la yareeyo kharashaadka sababta oo ah haddii macaashku kordho marka la yareeyo kharashka waxaa wadaagi doona maalgaliyaha iyo dawladda.

Si kastaba ha ahaatee cashuurta macaashka natiijo fiican kama soo baxdo marka la barbar dhigo sharuudda ah in dakhliga xili hore la helo oo uu noqdo mid lagu kalsoon yahay. Kolba inta ay cashuuraha macaashku ay ogolaanayaan in kharashaadka maalgaliyuhu galay hore loo daboolo, ayaa waxa ay yarayn doontaa

dakhliga dawladdu bilawga ay ka helayso mashaariicda waayo iyaga dib ayaa loogu riixayaa ilaa gabagabada mashruuca. Intaa waxa sii dheer, mudaynta iyo baaxadda dakhliga dawladda ee xilli kasta la helayo ayaa ah mid aan la hubin waxna ay taasi ku xiran tahay astaamaha/sifaadka waqtiga iyo baaxadda dakhliga iyo kharashaadka.

Marka la eego fikirka maalgaliyaha, waa la soo dhawayn karaa cashuuraha macaashka sababo dhawr ah awogood. Mid ka mid ah waxa ay tahay in la dhiiri galiyo kartida iyo doonitaanka in horumar sal-balaaran oo uu yeesho waaxda shidaalaku. Tan labaadna waxay tahay, ilaa mudo dhawayd awood umay lahayn maalgaliyayaasha caalamigu in ay uga dalbadaan dalka martigalinta leh/shidaalka loo qodayo in ay u bixiyaan lacag qaab ah amaahda cashuurta waajibka ah ee dalkooda asalka ah ilaa ay iyaga ku waajibayso cashuurta dakhliga ee dalka martigalinta leh.
Tan saddexaad waa, “sida dadku u arkaan” ee cashuurta macaashka, sida cashuurta guud ahaan la qaado ee dakhliga shirkadaha, cashuurta macaashku, waa kuwo la jecel yahay ilaa inta ay yihiin kuwo meesha ka saaraya shikiga guud ee ah in macaamilka shidaalku uu u danayeeyo mar walba maalgaliyaha.

Culayska maamul ayaa ah doodda ugu caansan ee ka jirta cashuuraha macaashka. Culayska la arkayaa waxa uu la xiriiraa ugu horayn hababka loo xisaabinayo ee loo dabagalyo. Dawladhuhu waxa ay sheegeen walaaca ay ka qabaan in awood darada haya’daha dawliga ee dalalkaasi keento lumitaanka dakhli badan.

Khidmadaha. Waxa laga yaabaa in khidmaduhu ay noqdaan mar walba wax isku mid ah oo dul saaran hal shay oo kasta oo la soo saaro ama in kolba laga qaado in u dhiganta wax-soosaarku inta uu yahay, kaas oo ah boqolkiiba inta dakhli ah ee shay kasta dul saaran. Tan dambe xadigu waxa uu noqonayaa in u dhaxaysa boqolkiib 10 iyo 12.

Dhaliisha ugu waynee ay leedahay khidmaddu waa caksiga faa’iida ay leedahay cashuurta macaashku. Iyada oo kolba ku xidhan heerkooda, waxa ay noqon karaan kuwo khalkhal ka galiya abaal-marinta maalgaliyaha oo sidoo kalana keena in uu aad uga hooseeyo heerka wax-soo-saarka ee ugu sareeya ee horumarinta waaxda shidaalka. **Jaantuska 7** iyo **8** ayaa mar labaad dib inoogu sawiraya Jaantuska 1 iyo 2, markan waxa ay ina tusayaan saamaynta ay leedahay khidmaddu..



Figure 7
Royalties and Efficient Field Production

Khidmadda labada jaantus lagu soo bandhigay waa nooca khidmadda ah ee u dhiganta wax-soosaarku inta uu yahay. Marka khidmadda laga qaado boqolkiiba in ka mida dakhliga “si xad dhaaf ah” waxa ay hoos ugu dhigaysaa qiimaha maalgaliyaha oo ka soo dagaya P una soo dagaya R sawirka dhexdiisa. Tusaalaha halka ceel ee lagu xusay Jaantuska 7, waxa ay tahay saamaynta ka dhalanaysaa in uu ka yaraado wax-soo-saarku heerkii ugu sareeyay Q* oo uu hoos ugu soo dhoco Q1. Q1 waa heerka cusub ee wax-soo-saarka kaas oo sida uu maal-galiyuhu u arko, kharashaadka oo kaliya daboolaya. Natiijada barbar socota ee heerka waaxda shidaalka oo dhan khusaysa, ee lagu muujiyay jaantuska 8, waa hoos u dhac ku yimi tirada mashaariicda la fulin karo ee A ilaa E khidmadda ka hor iyo A ilaa C khidmadda ka dib. Inta ay tahay saamaynta waxyeeladdu waxa ay ku xidhanaanaysaa baaxadda khidmadda iyo inta uu yahay kharashaadka wax-soo-saarku –

janjeerka xariiqad buluugga ahe ee jaantuska 7, iyo kharashaadka aadka u badan ee mashaariicda ee ku xusan jaantuska 8.

Saamaynta xun ee la xiriirta ee ay khidmaddu leedahay waa dib-u-dhac, taas oo ka soo hor jeedda sida la doonayo oo ah hor-u-mar/korodh. Maadaama oo khidmaddu aanay dareen u lahayn kharashka iyo

Figure 8
Royalties and Broad-based Development



macaashka, qaybta ay dawladdu helaysaa way yaraanaysaa halkii ay ka badan lahayd marka kharashku kordho ee macaashkuna bato. **Jadwalka 1** waxa uu ina tusayaa tusaale tiro ku salaysan.

Table 1
Royalties Are Regressive

	Calculation	Low Cost High Profit	High Cost Low Profit
(1) Gross revenues		100	100
(2) Cost		40	60
(3) Pre-tax margin	(1) – (2)	60	40
(4) Royalty (10%)	0.10 x (1)	10	10
(5) Royalty as % of margin	(4) / (3)	16.7	25

Inaga oo soo qaadanayna tirada dakhliga iyo kharashka ee lagu xusay jadwalka, boqolkiiba 10 khidmad ah waxa uu keenayaa boqolkiiba 16.7 inay noqoto inta ay qaadanayso dawladdu taas oo ka mid ah macaashka dheeraadka ah marka kharashku hooseeyo, ee dakhliguna badan yahay, halka uu noqonayo qaybta dawladdu marka kharashku badan yahay ee macaashkuna yaryahay boqolkiiba 25. Dabcigan aan is badalka lahayn waxa uu horseedayaa in xiligii loogu talo galay xili ka horeeya laga tago ceelasha wax laga qodayo marka kharashka wax-soo-saarku uu aad u kaco ee waaxda shidaalkuna gaaro heer ah in la daayo oo faraha looga qaado, sababta oo ah kharash badnida mashaariic dartood oo haddii aysan taasi jirin la fulin kari lahaa.

In kasta oo ay jiraan arimahaas walaaca lihi, khidmaddu waxa ay wali tahay qayb muhiim ah oo ka mid ah nidaamyada maaliyadda ee shidaalka sababtuna waxa ay tahay dhawr arin:

Ta koobaad, waa caksiga cashuuraha macaashka oo khidmaddu waxa uu dakhli soo galiyaa dawladda

martigalinta leh Maalinta Koobaad ee waxsoosaarku bilaabmo dakhligaasina waa mid la isku halayn karo mar kasta oo uu jiro wax-soo-saar. Hadii khidmadda la qaadayo lagu xadeeyo heer macquul ah, maalgaliyayaasha iyo dawladduba si isku mid ah ayay u jeclaysanayaan. Haddi la awoodo in hore wax loo siiyo dalkii waxsoosaarku ka socday, haba ahaato wax yar eh, waxa ay noqonaysaa “war fiican”.

Tan labaad, waxa aynu sidoo kale barbar dhigaynaa macaashka cashuuraha eh, waxa khidmadda loo arkaa in si fudud loo maamuli karo oo karti wayna ugama baahna wadanka wax-soo-saarka laga samaynayo maamuladooda dakhliga. Tani badh ahaan run ayay noqon kartaa, laakiin tayo xumada iyo saamaynta ay ku leedahay horumarka haddii xoog loogu tiirsado khidmadaha ayaa iyadna muhiim ah in maskaxda lagu hayo. Nidaam dhex ah, ayaa mar walba la helaa, kaas oo ugu tiirsan cashuuraha macaashka dhanka tayada, oo khidmadahana ugu tiirsan astaamaheeda kale ee wanaagsan. Waxa habkan lagu xoojin karaa in la sameeyo barnaamuj lagu dhisayo tayada maamulka dakhliga.

Wadaagga Wax-soo-saarka*. Wadaagga wax-soo-saarka waa heshiis iyo nidaam maaliyadeed oo caan ka ah hawlgalada shidaalka, gaar ahaan dalalka soo koraya. Habkan si fiican ayay u yaqaanaan una ogol yihiin maalgaliyayaasha caalamiga ahi*. Dhinacyadiisa maaliyaddu waxa ay isku keentaa cashuuraha macaashka iyo khidmadaha labadaba.

Figure 9
Production Sharing Schematic: Base Case



Nidaamkan wadaagga waxsoosaarka boqolkiiba in go’an oo ka mid ah wax-soo-saarka ayaa gaar loo dhigaa si loogu daboolo kharashaadka uu galayo maalgaliyuhu (“Saliidda Kharashka”). Inta ka soo hadha shidaalka la soo saaro (“Saliidda Macaashka”) waxa wadaaga dawladda (ama cida ka wakiilka ah) iyo maalgaliyaha iyaga oo u kala qaadanaya boqolkiiba inta ay ku heshiiyeen ama ay ku gorgortamaan dawladda iyo malgaliyahu. Wadaagga macaashka Saliiddu waxa uu la mid yahay cashuurta macaashka. Boqolkiiba inta cayiman ee loogu talo galay in ay daboosho kharashka hal xili xisaabeed gudaheed ayaa damaanad qaadaysa in dawladda wax la siiyo ugu yaraan, in kastaba kharashka dhabta ahi ha noqdo eh; sidaa darteed waxa uu la mid yahay khidmadda oo kale. Maadaama oo uu yahay hab laba iskugu jira waxa uu leeyahay wanaaga iyo dhibaatada cashuuraha macaashka iyo khidmadda labadaba. **Jaantuska 9** waxa uu soo bandhigayaa muuqaal muujinaya wadaagga wax-soo-saarka.

Habka kharash daboolidda*. In kasta oo aan loo arag in uu yahay hab maaliyadeed sida ay cashuurta macaashka, khidmadaha, iyo wadaaga wax-soo-saarka oo kale, habka* kharashka lagu daboolayo ee nidaam kasta oo maaliyadeed oo shidaalku leeyahay waxa uu saamayn wayn ku yeelan karaa natiijada maaliyadda iyo qiimaynta nidaamyada ee lagu qiyaaso ujeedooyinka maaliyadda. Hababka ugu muhiimsan waxa ka mid ah: qeexitaanka kharashaadka la ogol yahay; sida loola dhaqmayo lacagaha ku baxay xubna kale; xeerarka kharashaadka ama/iyo kharashka duugowga; xeerarka maamulaya isku darka kharashaadka si loo daboolo; iyo hababka loo daboolayo kharashaadka marka hawlgallada la joojinayo. Dhawr ka mid ah hababkaas waxa si faahfaahsan loogaga hadli doona **ciwaanka maaliyadda gaarka** ah ee hoos ku xusan.

Gunooyinka. Gunooyinku waa wax hal mar uu maalgaliyuhu bixiyo taas oo ku xidhan dhacdooyin gaar ah ama gaaritaanka bartilmaameed cayiman sida saxeexidda liisanka, ku dhawaaqidda helitaanka shidaal ganacsi noqon kara, iyo/ama gaaritaanka heer wax-soo-saar oo gaar ah. Gunooyinku waxa ay noqon karaan wax la soo jeediyay, mid laga gorgortamo, ama mid go'an. Sanadahan ugu dambeeyay gunooyinka la bixiyo marka la saxeexo/ansixiyo dalab ayaa noqday ka loogu xiiso badan yahay; marka ay duruufuhu saxan yihiinna waxa uu gaari karaa heer aad u ballaadhan.

Gunnooyinka Saxeexa lagu bixiyo waxa la bixiyaa hawlgalada ka hor. Waa kharash "hore loo galay" sidaa darteed saamayn kuma laha go'aan gaarista maalgaliyaha ee mustaqbalka waxa soo socda. Ma faragaliyaan wax-soo-saarka wanaagsan mana khalkhaliyaan inta uu gaarsiisan yahay hurumarka mashruucu ee uu ka marayo heerka waaxda shidaalka.

Gunooyinka lagu bixiyo saxeexidda dalabka waxa ay ku darsamaan kirada la soo xeraynayo. Baaxadda dalabku waxa ay ku xidhan tahay waxa maalgaliyuhu uu ka rajaynayo iyo kirada uu filayo in uu mashruuca uu ka helayo hadii uu guulaysto. Markaas habdaba waxa ay noqonayaan kuwo kordhaya – mar kasta oo ay wayntahay kirada la filayaana, gunnadu waa ay waynaanaysaa. Saamiga dawladdu waxa uu la kordhayaa korodhka macaashka, xaaladdan machaashka laga hadlayo waa ka la filayo, ma aha mid dhab ah.

Si cad waxa ay u daboolayaan gunnooyinka sexeexa lagu bixiyaa shuruudaha dawladda ee ah in la helo dakhli dagdag ah. Nasiib darro, xaaladaha qaar kood baahida ay dawladdu kharash ugu baahan tahay ayaa aad u sareeya, sifadanna waxa ay keeni kartaa in hanaanka liisan bixintu ay ka jeediso indhaha muuqaalada kale ee qaabka maalgashiga, maaliyad ha ahaadaan ama wax kala eh.

Way u dulqaataan maalgaliyayaashu gunnooyinka saxeexa lagu bixyo hadii ay yihiin heer macquul ah. Macquul waxa laga wado waxa ay ku xiran tahay dhismaha dhulka, arimo kale oo sharci iyo nidaam maaliyadeed ah, iyo fikirka laga qabo khatar siyaasadeed in ay dhici karto. Waxa ay sidoo kale ka walwali karaan maalgalinta sahaminta iyo lacagta ku baxaysa soosaaridda ee hore uga sii baxaysa marka ay jraan suurto galnimada in dawladdu kalideed ka gorgortami karto heshiiska, sidaa darteed waa laga yaabaa in ay ka maagaan/gaabsadaan maalgaliyayaashu in ay hore u soo qadiman gunno ay hore ka sii bixiyaan taas oo la mid ah qiimaha dhabta ah ee khayraadka. Gunooyinku badanka waa in yar qayb kaliya oo ka mid ah nidaamka maaliyadda; waxa lagu ladhaa habab maaliyadeed oo kale oo ku xidhan in qaybta dawladdu la socoto dhab ahaan wax soo saarka oo aanay ku xirnaan waxsoosaarka la filayo.

Habab loo qabanayo/xeraynayo kirada oo dabacsan. *Midkasta oo ka mid ah hababka maaliyada eek or lagu xusay waxa looga dan leeyahay in uu soo xereeyo qayb ka mid ah kirada mashaariicda shidaalka ee dawladda ama gobolka. Way kala duwan yihiin kirada iyo macaashku*, hase yeeshee, mashruucba mid ayuu ka duwan yahay, waqtiba kan kale ayuu ka duwan yahay, waxa kala duwan tayada dhulka, oo waxa is badalaya qiimayaasha. Waxa kale oo ka jira arimo kale oo ay ka mid yihiin: kala duwanaanshaha qiimaha shidaalka astaamaha soosaariddisu kala duwan tahay; waxa kala duwan duruufaha shaqo iyo kharashka; waxa kala duwan waqtiga ganacsi ku iman karo; waxana kala duwanaan kara sifada/astaamaha waxsoosaarka. Caqabadda hor taagan cidda qorshaynaysa nidaamyada maaliyada shidaalku waa in ay dajiyaan hab markiiba la jaanqaadi kara isbadaladaasi. Hadii aanu jirin hab gaar ah oo isbadal dagdag ah keeni kara hadii duruuftu isbadasho waxa uu keenayaa in ay dawladdu dib ugu laaabato nidaamka ama waxa uu culays ku saarayaa maalgaliyaha in dib looga wada xaajoodo heshiiska si dib loogu saxo sinaan la aanta la dareemayo ama khalkhalka ku yimi abaalmarintooda.

Dhab ahaan, waxa la soo jeediyay habab dhawr ah oo la iskugu dayayo in ay keenaan dabacsanaanta la doonayo. Hababani waxa ay badanka isku daraan dhawr nidaam (cashuur, khidmad, wadaag waxsoosaar, cashuuro dheeraad ah, iwm) ama kuwa la arki karo ee lagu badalan karo si mashruuca looga macaasho. Waxa taasi badalkeedu yahay, in nidaamka maaliyadda lagu xiri karo macaashka laftiisa. Tusaalayaal ayaa hoos ku xusan:

- Wadaagga dawladda ee waxsoosaarku waa mid ka imanaya isku darka ama xadiga waxsoosaarka maalinlaha ah
- Khidmaduhu waxa ay lasii koraan qiimaha
- Qaybta dawladdu waxa ay la waynaataa marka hal maalgashi ama in badan la daboolo kharashkooda

- Inta ay dawladdu qaadanayso waxa uu ku xiran yahay goobta hawlgallada, nooca haydarakaarnoonada/saliidda iyo gabowga/da'da waxsoosaarka
- Qaybta dawladdu waxa ay la korodhaa samaiga maaliyada sida dakhliga la cashuuri karo inta uu ka yahay dakhliga guud ama inta isku gaynta waxa soo gala ay ka tahay wadarta waxa baxa (waxa loo yaqaan marmarka waar "Qodobka-R") factor
- Qaybta dawladdu way isbadashaa waxana ay ku xiran tahay macaashka la helo oo lagu qiyaaso in uu macaash doonayo maalgaliyuhu (ROR)

Dhibta ka jirta adeegsida wax macaashka lagu badasho si loo dhaliyo dabacsanaan maaliyadeed ayaa ah kaliy badal – waa kusii simid. Waa wax badh ah, badankana talaabooyin aan sax ahayn oo macaash lagu raadinayo waxana suuro gal ah in dagdag looga baxo. Fudaydka ma muuqdaa waa mid been ah. Khaladaadkooda iyo dhamaystirnaan la'aantooda ayaa badanka ku keenta culays nidaamka xasilinta maaliyadda, isbadalo ku yimaadda heshiisyada, in ay korodho dareenka uu khatartka ka qabo maalgaliyuhu iyo baahida loo qabo xasilinta maaliyadda, iyo balaarashada culayska nidaamka.

Jadwalka 2 waxa uu soo koobayaa nidaam lagu soo bandhigay nuqul qabyo ah oo ku saabsan waaxda shidaalka ee Nayjeeriya. Waa isku day la doonayo in wax lagaga qabto duruufaha kala duwan oo isla markaana lagu aqoonsanayo in gaabiska ka yimi badalka macaashka lagu raadinayo uu horseeday dalab aad u culus kaas oo aad ugu dhaw in uu hubaashii uu ka gaabiyo hadafkii loogu talo galay kaas oo noqon doona maamul aad u xun.

Table 2
Nigeria's Proposed Petroleum Industry Bill:
Bells and Whistles

- Royalties are a function of:
  - Price
  - Production rate
  - Type of hydrocarbons
  - Location (water depth)
- Production sharing is a function of:
  - Production
  - Location
- Tax regime varies with
  - Location
  - Type of hydrocarbons
  - Field size

Jadwalka 3 waxa uu soo bandhigayaa isbarbar dhigga tayada ama wax ku oolnimada ay leeyihiin hababka kala duwan ee lagu soo xereeyo kirada marka la soo saarayo nidaamka qaybta dawladdu hesho oo si buuxo wax uga qabanaya dhamaan arimha muhiimka ah ee kiini kara macaashka mashruuca. Tusaale ahaan, haddii aynu akhrino jadwalka, isku xidhka qaybta dawladdu helayso iyo waxsoosaarka maalin laha ah iyo ka wadarta guud waxa uu wax ka qabaynaa saamaynta waxsoosaarku ku leeyahay macaashka, laakiin waxa uu gafayaa sida uu wax uga qabanayo saamaynta kale, ee sida, tan qiimaha iyo kharashka oo kale. Isku xirka qaybta dawladda iyo qiimaha waxa uu soo bandhigayaa saamanta qiimuhu uu ku leeyahay macaashka, laakiin waxa uu hilmaamayaa waxsoosaarka iyo kharashka. Iyo wax la mid ah.

Table 3
Responsiveness of Rent Capture
Mechanisms to Determinants of Profitability

	Government "take" responsive to:				
Government "take" linked to	*Production*	*Price change*	*Costs*	*Timing of cash flow*	*Cost of capital*
Production (daily or cumulative)	**Yes**	No	No	Partly	No
Price (price caps or base prices)	No	**Yes**	No	No	No
Cost recovery (uplifts and write-off rates)	No	No	**Yes**	Partly	Partly
Simple indicators (location, vintage, and so forth)	No	No	Partly	No	No
Financial ratios (e.g., taxable income to revenue)	**Yes**	**Yes**	**Yes**	No	No
Rate of return (ROR)	**Yes**	**Yes**	**Yes**	**Yes**	**Yes**

kaliya marka hababka lagu soo xereeyo kirada lagu xiro macaashka laftiisa, oo lagu cabiray macaashka uu rabo maalgaliyaha ee dhabta ah ROR ayaa waxa ay keenaysaa in nidaamka qayta dawladdu hesho oo si buuxda wax uga qabanaya dhamaan arimaha macaash keenaya. In diiradda la saaro xidhiidhan oo qura waxa uu leeyahay faa'iido dheeraad ah in uu ka feejignaado baahi in loo qobo gabi "sii qurxinta" ee ku jira dalabka Nayjeeriya soo bandhigtay ee lagu soo koobay Jaantuska 2.

Doodaha taageeraya habka ROR aad ayay u xoogan yihiin. Waxa ay gabi ahaanba xoogga saarayaan in aanay macaashka iyo kirada dheeraadka ahi waxba khalkhal ku ridin go'aamada maalgaliyaha ee khuseeya heerka waxsoosaarku ama horumarinta mashruucu marka uu ugu wanaagsan yahay. Marka la qeexo waa nooc kordh ah. Maadaama oo uu ku salaysan yahay macaash si dhab ah loo helay waxa uu habkani laga yaabaa in uu fudaydiyo wada-xaajoodyada oo uu yareeyo dalabka maalgaliyahee khuseeya xasilinta maaliyada.

Arinta ugu wayn ee lagaga soo horjeedo nidaamka ku qotoma macaashka uu rabo maalgaliyuhu ROR ayaa ah in dhab ahaan uu noqonayo mid aad u culus maamul ahaan. Runtii, in yar oo dheeraad ah ayuu ka culus yahay cashuurta macaashka ee caadiga ah ama wadaagga waxsoosarka, xisaabaadka iyo xogta looga baahan yahay hirgalinta iyo maamulku waa isku mid. Maadaamo oo ay ganaaxa dheeraadka ah ee nidaamka ROR ay bilaambaan kaliya marka la dhaafo/laga gudbo xeerka qiyaasta ah ee macaashka, dakhliga dawladda ayaa dib u dhaca. Tan waxa lagu kabi karaa in lagu lamaaneeyo habka ROR hab maaliyadeed oo kale oo xaga hore ka culus sida khidmadda.

Ka qaybgalka gobolka/dawladdaa. Badanka xeerarka shidaalku waxa ay ka hadlaan ka qayb-galka dawladda/gobolka eek u wajahan hawlaha shidaalka. Dhawr doorasho ayaa jirta, dhamaantood marka hal mid laga reebo waxay leeyihiin saamayn maaliyadeed.

Si siman uga qabyqaadashadu waxa ay u baahan tahay in dawladdu *si siman* ugala qayb qaadato saaxiibadeeda aan dawliga ahayn dhamaan khatarta, kharashka, iyo dakhliga ugu horayntaba. Ma jiraan saamayn maaliyadeed. Waxa ay saamayn dhab ah ku yeelanaysaa dawladda marka laga eego dhinaca ogolaanshaha iyo waajibaadka maalgalinta, hase yeeshee, tani waxa ay cadaynaysaa in ka qaybqaadashada habkan ahi uu yahay mid dhif iyo daadir ah. Hab ka kooban ayay u isticmaalaan, Nayjeeriya, Angoola, iyo Indooniisiya.

Figure 10
Competing Budgetary Allocations in Nigeria



Marka laga reebo arimaha keena ee aan ahayn dhaqaalaha, sida abuuridda awood qaran, iyo in si buuxda loo soo xereeyo kirada lala xiriiriyo saamiga ay dawladdu kaga qayb galayso, waa dood badanka lala kulmo oo ku saabsan ka qayb-qaadasho siman. Waa in niyada lagu hayaa, hasayeeshee, in aanay tani la imanayn in loo baahdo maalgalin wayn iyo in khatar la galiyo lacagta dadwaynaha taas oo meelo kale looga faa'iidaysan lahaa, sida in lagu dhiso kaabayaasha dhaqaale ee muuqda iyo kuwa bulsho ee kale, laakiin nidaam laamliyadeed oo wanaagsani waxa uu noqon karaa mid sidoo kale ku wanaagsan soo-xeraynta kirada. **Jaantuska 10** waxa uu soo bandhigayaa, miisaaniyadda sanadaha 2005-2007, tartanka adage e ka dhexeeya maalgalinta la rabo in lagu taagero in ay Nayjeeriya si siman oo dhamaystiran uga qayb-qaadato hawlaha gaaskta iyo saliida iyada oo adeegsanaysa shirkadeeda saliidda NNPC iyo in loo qoondeeyo miisaaniyadda waaxyo kale oo dhaqaale ama bulsho oo muhiim ah. **Jaantuska 11,** waxa loo diyaariyay nidaamka maaliyadda dhawr dal, waxa uu muujinayaa meehsa saamiga ugu wayn ay dawladdu ka hesho oo ah nidaamka cashuurta, taas oo in yar oo dheeraad ah oo kaliya lagu heli doono ka qayb-gal dhamaystiran oo simani haddii uu yimaado.

Figure 11
Equity Returns vs. Tax Revenues



Wax aad uga caansan habka ka qaybgalka dhamayska tiran habka loo yaqaan "dulsaar wataha" ee ka qayb-galka kaas oo maalgaliyuhu uu maalgalinayo saamiga dawladda ee kharashaadka waxana isaga dib loogu soo celinaya dulsaar (interest) ka yimi saamiga ay dawladdu kaga qayb-galayso/ka qaadanayso macaashka. "carry" waxa laga yaabaa in uu saameeyo kharashaadka sahaminta iyo qiimaynta, waxa sidookale laga yaabaa in uu saameeyo kharashka horumarinta. Maaliyadda u dhiganta habkan waa cashuur kiro oo ku salaysan inta uu macaash doonayo maalgaliyuhu (ROR-based rent tax) – maalgaliyuhu waxa uu dib dhigayaa dhamaan maalgalinta waxana loo ogol yahay in uu dib ka helo macaash la isla qaatay inta aysan dawladu qaadan saamigeeda maaliyadeed.

Habka sadexdaad waa ka qayb-qaadasho siman oo xor ah. Dawladda ayaa loo cayimayaa saami xoriyad ku dhisan oo ka mid ah qulqulka lacagta mashruuca taas oo u dhiganta inta laga helayo lacag qaybta cashuurta. Wadaagga cashuurtu waa nooc ka mid ah saamiga xorta ah. Waxa ay u cayimaysaa saami xor ah oo ka mida lacata mashruuca, laakin siidoo kale kaalin ayuu ku soo siyaadinayaa maamulka mashruuca ah taas oo noocyada kale ee ka qayb-qaadasho siman oo xor ah laga yaabo in aysan yeelin.

Mar kasta oo ay dhinac maaliyadeed qaacidada ka qaybqaadashada ee dalku isticmaalayaa leedhay, waxa ay maalgaliyayaasha mustaqbalku ku darsanayaan xisaabta, iyada oo ay suuragal tahay in ay dalbadaan arimo aan ku haboonayn dawladda marka meelaha kale la eego si meesha looga saaro saamaynta ka qaybqaadashada dawladda ka dhalanaysa.

V. Bushqadda maaliyadda

Ujeedooyinka maaliyadda ee badani waxa ay u baahan yihiin habab maliyadeed oo badan. Sidaa awgeed nidaamyada maaliyada ee shidaalku had iyo jeer waxa ay ka kooban yihiin habab isku dar ah. Bushqadda

ugu caansan waa ta isku darka cashuurta-khidmadda iyo nidaamka wadaagga waxssoosaarka.

Habka cashuurta-khidmaddu waxa uu ka kooban yahay cashuur dakhli oo aasaasi ah (cashuur shirkadeed oo si guud loo qaado dalka dhexdiisa), isku darka khidmadaha ugu yar iyo cashuurta macaashka oo dheeraad ah si ay ugu adeegto habka cashuur xeraynta khordha oo kale. Waxa laga yaabaa in ay ka mid tahay sidoo kale hab ay dawladdu kaga qayb-qaadanayso. In kasta oo hore loogu yaqaanay dalalka soo koraya, qaaciidada cashuurta-iyo-khidmadda isku jira waxa sidoo kale lagu arkaa dalal horumarsan.

Hababka wadaagga waxsoosaarku waxa uu ka kooban yahay hab daboolaya kharashaadka oo aasaasi ah iyo heshiis kale oo wadaag waxsoosaara oo la socda, si loo gaadho korodhka maaliyadda, waa kororka saamiga dawladda oo ku xiran waxsoosaarka. Waxa laga yaabaa in aan khidmadda si muuqata loogu darin. Waa lagu dari karaa/waa ikhtiyaar ka qayb-galka dawladdu. Marka lagu daro wadaaga waxsoosaarka, waxa maalgaliyuha lagala xisaabtamayaa inuu bixiyo cashuurta dakhliga shirkadaha ee dakhliga guud ee laga helay Dabooliydda Kharashka iyo Wadaagga Waxsoosaarka ee Qandaraaska/Heshiiska Wadaagga Waxsoosaarka oo laga gooyay kharashaadka sida lagu ogolaaday cashuurta dakhliga shirkadda ama si gaar ah loogu cayimay Cashuurta dahliga shidaalka. **Jaantuska 12** waxa uu ku soo celinayaa xogtii Jaantuska 9 oo lagu daray khidmad iyo cashuurta dakhliga. Dalalka soo korayaa waxa ay muujiyeen inay danaynayaan Wadaagga Waxsoosaarka taas oo si wayn ugu tiirsan madaxbanaani iyo arimo aan ahayn dhaqaale.

Figure 12
Production Sharing Schematic with Royalty and Income Tax



Jadwalka 4 waxa uu wax inaga tusayaa bushqadaha maaliyadda ee lagu isticmaalo dalal dhawr ah oo shidaal soo saara oo la soo xulay. Xaaladaha qaar dal ayaa laga yaaba ain uu leeyahay hal nidaam wax ka badan oo hal mar wada shaqaynaya.

Table 4
Fiscal Packages: Indicative Practice

Country	Tax/Roy	PSC	Service	Participation
Algeria	X	X	X	X
Egypt		X		
Libya	X	X		X
Morocco				
Sudan		X		X
Tunisia	X	X		
Angola	X	X		X
Indonesia		X		X
Norway	X			X

waa muhiim in la aqoonsado in heerka maaliyadda ee dhamaan hababkan laga dhigi karo kuwo isku dhigma. Waxa muhiimka ahi waa in la qorsheeyo oo la isku barbar dhigo nidaayada maaliyaddu waa in laga gudbo calaamaddooda/magaca – cashuur/khidmad ama wadaag waxsoosar – waana in la eego faahfaahinta gaarka ee bushqadda marka laga eego dhanka qabka iyo cabirka tirada.

VI. Qiimaynta Nidaamka Maaliyadda

Waa maxay sababta qiimaynta loo samaynayaa? In xili hore wax la qiimeeyo si joogto ahna loogu sameeyo nidaamka maaliyadda ee shidaalka ayaa waxa ay muhiim u tahay tayada iyo wax-ku-oolnimadda. Qiimayn joogto ah waxa ay caawinaysaa ujeedooyin badan oo muhiim ah.

Qiimaynta ugu horaysaa waa ta qorshaha bilowga ee nidaamka maaliyadda dalka khusaysa. Qiimayntu waxa ay ka caawinaysaa in ay doortaan nidaamka ugu fiican eek u haboon baahida iyo doonitaanka dalka. Qiimayn kasta oo ka sii dambaysa waxa lagu ogaanayaa baahi, haddii ay jirto, si dib-loogu fiiriyo ama loogu cusboonaysiiyo marka ay duruufuhu is badlaan. Hawlgalkan waxa uu si gaar ah ugu haboon yahay marka la galayo diyaargarowga liisan cusub lagu bixinayo. Marka lagu dhawaaqo hawsha ee liisamada mustaqbalka lagu dhawaaqo, awoodda si dagdag ah loogu qiimayn karo dalabyada la soo gudbiyo marka waxa xaajoodku socdo waxa uu ku xidhan yahay hab qiimayn maaliyadeed oo shaqaynaya.

Hadii jidkaa la sii raaco, marka hawlaha sahaminta iyo qiimaynta lagu ogaado in uu jiro shidaal ganacsi gali kara, dawladda martida loo yahay waxa laga yaabaa in ay hab gaar ah oo wax lagu qiimeeyo ku kalsoonaato si loo go'aamiyo xulashada ama iska-daynta in ay maaliyad ahaan kaga qayb qaadato xiliyada horumarinta iyo sahaminta shidaalka. Ka qayb-qaadashada ama iska daynta, in la sii matalo/tijaabiyo waxa ay taageero wayn u noqonaysaa qorshaynta dhaaqaale ee qaybta shidaalka iyo heerka dhaqaalaha guud ee wadanka.

Tan ugu dambaysa, marka qiimaynta laga sameeyo heer mashruuc waxa laga yaabaa in la helo liis lagu qiyaaso dabagalka maaliyadda. Faraq wayn oo u dhexeeya natiijooyinka ka soo baxda dabagalka lacagaha la bixiyay iyo waxa ay qiimayntu sheegtay ee ay ahayd in la bixiyo waa in uu feejignaan keeno oo uu talo ku bixiyo baahida loo qabo in baaritaan fog lagu sii sameeyo.

Maxaa la qiimaynayaa? Nidaamyada maaliyadda waxa la qiimayn karaa marxalado kala duwan. Saamaynta hal mashuuc oo qudha ayaa la qiimayn karaa, dhamaan xiliyada uu soo maray (sahaminta ilaa waxkaqabashada iyo soosaaritaanka) ama hal marxalad ah iyo wixii ka dambeeya (sida., marxaladda ka bilaabanta horumarinta/wax-soo-saarka). Natiijooyinka ka soo baxa qiimaynta hal mashruucda kali kalida ah waa la isku dari karaa dhamaan si loo helo natiijada waaxda shidaalka oo dhan.

Hawlagalada qiimaynta ah ee ugu faa'idada badan waxa ka mid ah nooca laga fikirayo inta siyaabood ee wax u dhici karaan (scenario building). Inta laga soo qaadayo qiimaha, wax-soo-saarka, kharashaadka, ama

waqtiga ayaa la badbadalyaa si loo “jaha wareeriyo” qiimaynta oo loo soo saaro natiijooyin ku salaysan “maxaa-dhici-kara” marxaladaha kala duwan. Daraasaddan isbadalka lagu fiirinayo ee noocan ah waxa ay muhiim u tahay marka la samaynayo qorshe dhaqaale oo masuuliyad ku dheehan tahay.

Shuruudaha Qiimaynta iyo tilmaahaha guusha. Halka ay qiimayn kastaa ka bilaabantaa waa in lagu heshiiyo shuruudaha qiimaynta. Waxa laga yaabaa in ay fara bataan, laakiin liiska ujeedooyinka nidaamka maaliyadeed ee lagu xusay qaybta kore ee IV ayaa wax inooga tilmaamaya. Nidaamka maaliyadda ma laga filayaa in uu dhiiri galiyo tayo iyo horumar balaaran? Miyuu ku fiicnaan doonaa soo xeraynta kirada? Ma yahay mid kordhaya/koror samaynaya? Ma dhiiri-galinayaa yaraynta kharashka? Ma keenayaa dakhli dagdag ah oo lagu kasoonaan karo? Muxuu ka oranayaa wadaagga khat arta ee u dhexeeya maalgaliyaha iyo dawladda? Ma yahay mid caalamka la tartami kara?

Waa in shardi kasta oo wax lagu qiimaynayo lagu beegaa hal ama dhawr tilmaame oo waxqabadka lagu cabiro/qiyaaso. Macaashaka mashruuca ee maalgaliyuhu rabo ee la male-awaalayo ROR iyo inta qaybta dawladdu noqonayso boqolkiiba waxa si wayn loogu adeegsadaa in waxqabadka nidaamka la barbar dhigo oo lagu qiyaaso ujeedooyinka nidaamka maaliyadda. Maalgaliyhu macaashka uu rabo waa kan uu heli karo ka dib marka dawladdu qaybteeda qaadato. Dhawr qiyaasood oo lagu cabiro inta qaybta dawladdu tahay ayaa dhab ahaan jira, laakiin tan ugu saxan waa in la qiyaaso qulqulka naqdiga/lacagta mashruuca oo ah qiimaha hadda ee lacagaha dawladdu helayso mustaqbalka oo loo qaybiyay qiimaha hadda ee wixii-hore loo qaatay oo saafi ah.

Tusaale ahaan, labadan tilmaame waxa in badan loo adeegsadaa in lagu qiyaaso saamaynta suuro-galka ah ee uu ku yeelanayo nidaamka maaliyaddu wanaaga wax-soo-saarka korodhka horumarka/wax-soo-saarka. Isla labadan tilmaame, ayaa lagu tijaabin karaa kororka marka la xisaabiyo macaashyada kala duwan ee mashruuca. Hadii uu habku yahay kan korodhka, macaashka uu doonayo maalgaliyuhu waa in uu sii bato, kolba marka macaashka mashruucu uu kordho, hab sii yaraanaya ayuu u kordhayaa. Xadiga qaybta ay dawladdu qaadanayso waa uu kordhayaa marka macaashku uu kordho. Marka lagu xisaabiyo dalal kala duwan nidaamkooda maaliyadeed, xadiga qaybta dawladdu qaadanayso waxa uu wax ka tari karaa ka jawaabidda su’aasha ku saabsan sida nidaamka dalka martigalinta lihi uu la tartami karo dalalka kale ee caalamka. Jaantuska 4 ee kor ku xusan waxa uu si matialid/mala’awaal ah isku barbar dhigayaa boqolkiiba inta uu yahay xadiga ay qaataan dalal kala duwani.

Qulqulka lacagta ee dawladda iyo qandaraaslaha oo lagu soo saaray habka qiimaynta ayaa ku wargalin kara siyaasiyiinta xiliga lacagta la helayo, iyo sida loo wadaagayo khatarta ka imanaysa isbadbadalka qulqulka lacagta..

Arimaha uu u baahan yahay habka qiimaytu. Soo bandhigidda qiimayn wanaagsan waxa ay si wayn ugu tiirsan tahay hilitaanka xog lagu kalsoonaan karo: sida qiimayaasha (oo laga soo qaaday siday waayadii hore ahaayeen ama ay mustaqbalka noqon karaan); Wax-soo-saarka; kharashaadka (kuwa raasamaalka hantida wayn iyo kuwa hawlaha joogtada ah). Xogta waxa lagu heli karaa in ogolaansho loo soo qaato ama laga soo ururiyo ceelasha. Heshiisyada maaliyadda (kuwa sharci lagu sheegay ama kuwa lagu xusay heshiis qandaraas ama liisan) waa in iyagana sidookale lagu helaa hab qandaraas ama meel liisan/ogolaansho loo haysto. Tani waxa ay ogolaanaysaa in tafaasiil laga bixiyo habkaas, sidoo kale, marka lagu daro xogta la hayana, waxa la helayaa natiijooyinka qiimaynta ee la raadinayo.

Si ay faa’iido u yeeshaan waa in habka mar walba la cusboonaysiiyo. Cusboonaysiin sax ah waxa ay u baahan tahay isku xidhnaan ka dhaxaysaha hay’adaha, gaar ahaan wasaaradaha waaxda, wakaaladaha xeerka nidaamintiisa ku shuqul leh, iyo hadii uu jiro shirkadda saliidda qaranka. In gaashaan buuraysi dhaw lala yeesho cida isticmaalayska natiijada habka, sida, wasaaradda maaliyada, maamulka iyo madaxda dakhliga iyo wasaaradda qorshaytna, ayaa muhiim ah si looga faa’iido dhamaan waxtarka iyo qiimaha uu leeyahay habkani. Ugu dambayntii, in la xaqiijiyo helitaanka awoodaha la doonayo ka hor – xirfadaha iyo khayraadka – waa muhiim in meel lagu tiiriyo oo la joogteeyaa.

VII. Qodobo maaliyadeed oo gaar ah

Qaybtan waxa lagu fiirinayaa liis qodobo ah oo aan dhamaystirnayn oo si gaar ah loo soo xulay kuwaas oo badankana ka yimaadda duruufaha/xaaladaha cashuurta shidaalka; qiimayaasha maaliyadeed; arimaha la xiriira daboolida kharashka; haysashada cashuurta iyo heshiisyada laba-jeer cashuuridda; cashuuraha la

xidhiidha xawaaladda/wareejinta; iyo xasilinta maaliyadda.

Qiimayaasha maaliyadeed. Kuwani waa qiimayaasha loo adeegsado in go'aan looga gaaro waxa waajib ku ah ee uu bixinayo maalgaliyuhu, sida., cashuurta dakhliga, khidmadaha, wadaagaa waxsoosaarka. Waa la fahmi karaa in dawladuhu ka maagayaan/gaabsanayaan in ay si fudud u aqbalaan oo la qaato qiimaha uu soo jeediyo maalgaliyuhu, gaar ahaan marka marka arinta laga hadlayaa u dhaxayso kooxo isku xiran.

Meelaha qiimaha shidaalka walwal ka taagan yahay dawladuhu waxa laga ayaabaa in ay aqbalaan qiimaha uu soo jeediyo maalgaliyuhu haddii uu si lagu qanci karo u caddayn karo in iibku ka dhexeeyo kooxo aan xiriir lahayn. Waxa taas ka sii caansan, dawladuhu waxa ay adeegsadaan tixraaca qiimayaasha caalamka. Kuwaasi waa qiimayaal si rasmi ah u jira oo suuqa ku salaysan oo si joogta ah loo soo bandhigo oo loo soo daabaco kuwaas oo khuseeya saliidda cayriin ee sida balaadhan looga ganacsado. North Sea Brent, Nigeria Bonny Light, West Texas Intermediate, and Indonesia Minas ayaa dhamaantood ah meelaha qiimaha laga tixraaco. Marka qiimaha tixraaca ah la doorto ee lagu heshiiyo, waxa la hagaajiyaa/salaxaa faraqa u dhexeeya kharashaadka gaadiidka iyo faraqa u dhexeeya tayada labada saliidood ee cayriin (tafaasiisha cufnaanta, dufankeeda, inta salfar ku jirta) taas oo saamayn ku leh qiimaha. Sida qiimaha tixraaca ah oo kale, arimaha wax ka badalka keeni kara had iyo jeer waa la soo daabacaa waana la heli karaa mar walba. Habkani waxa uu mar walba ka hortagayaa khasaaraha iman kara iyo in maalgaliyaha la isku dhaco.

In la go'aamiyo qiimo maaliyadeed ee gaasta dabiiciga ah way ka adagtay. Sababtu waxay tahay, cakiska saliidda, suuqyada gaastu marka laga reebo Maraykanka iyo in badan oo Yurub ah, ma horumarsana qiimayaashuna si joogta ah oo marwalba la heli karo looma soo bandhigo. Intaasi waxa dheer, gaasta dabiiciga ah waxa looga ganacsadaa hab isku-jir ah, tusaale ahaan., ay ku jiraan wixii ceelka lagu hormariyay, hagaajinta dalka gudihiisa ka dhaca, gaadiidka sida dhuumaha ama maraakiibta qaadaya (marka ay tahay gaasta dareeraha ah ama LNG) iyo sii hagaajinta (sida. LNG re-gasification) lagu sameeyo meesha ugu dambaysa. Habaka qiimayntu duruufahaas oo kale waa kuwo la qariyo. Si loo helo ama loo dajiyo qiime maaliyadeed oo gaasta dabiiciga ahi leedahay waxa ay dawladuhu waa in ay saddex arin midkood inay yeelaan: (1) cabiridda qiimaha la rabo in uu daboolo kharashka oo uu kana helo macaash lagu qanci karo maalgaliyahu marka la joogo ceelka afkiisa ama barka ceelka ay kaga soo baxayo; (2) xisaabinta mudada lacagta gashay oo saafi ah la helayo oo ku salaysan la socoshada qiimayaasha ilaa uu gaarayo suuqa ugu dambayta lagu isticmaalayo oo kadib laga gooyo kharashaadkii suuqa lagu geeyay; ama (3) tixraaca qiimaha shidaalada muhiimka ah ee lagu badalkaro, sida, saliidda shidaalka culus ee suuqyada korontada/dab-dhalinta.

Arimaha ka taagan daboollidda kharashaadka*.* In la qorsheeyo lana hirgaliyo hab maalgaliyuhu dib ugu heli karo hantidii ka gashay kharashaadka ayaa waxa ay saamayn wayn oo aasaasi ah ku yeelan kartaa nidaamka maaliyadda ee dakhliga dawladda. Nasiib darro, laakiin qodobadan dadka in badani ma daneeyaan/xiiseeyaan marka labarbar dhigo xiisaha loo qabo xadiga cashuurtu ay noqonayso ama wadaagga waxsoosaarka iyo heerarka khidmaddu inta ay noqonayaan. Aad ayaa loo yaqaanaa muhiimadda ay go'aamada siyaasaddu ku leeyihiin waxa kharashaad baxay ah, iyo kharashaadka la mala'awaalayo ee la xiriira duugowga iyo xadigooda, laakiin waxa jira arimo la xiriira daboolidda kharashka oo kale, kuwaas oo aan si fiican loo qirsanayn muhiimaddooda. Saddex ka mid ah ayaa hoos lagaga hadli doonaa: qiimaha laamaha shirkaddu wax ku kala qaataan (Qiimaha Isku-gudbinta); habka kharashaadka iyo dakhliga mashaaricda lagu kala soocayo (habka daryridda); iyo habka lagula tacaalo/dhaqamo kharashaadka la xiriira joojinta wax-soo-saarka (kharashaadka joojinta hawlgaladda).

Qiimaha Isku-gubdintu waxa uu ku lugleeyahay marka maalgaliyahu u kala qaybiya dakhliga iyo kharashaadka dalalka ama xuduudaha maaliyadda ee dalka marti-galinayaha isaga oo ay ujeedadiisu tahay in uu yareeyo dakhliga cashuurtu ku dhacayso ama la wadaagayo. Haddii aan aad looga feejignaan qiimaha isku-qudbinta ee laga yaabo in ay shirkaddu si xun u adeegsato, waxa uu keeni karaa kharash aad u badan marka laga hadlayo dakhliga kaga lumaya dawladda. Maalgaliyayaashu waxa laga yaabaa in ay isku dayaan hoos u dhigidda dakhliga, iyo dakhliga cashuurtu ku dhici karto, iyaga oo kaga iibinaya laamahooda kale ee ay xidhiidhka leeyihiin qiime ka hooseeya kan suuqa. Si aan daacad ahayn ayay kor ugu qaadaan kharashaadka ay ka gooyaan dakhliga, kadibna ay u yareeyaan dakhliga cashuurtu ku dhici karto, taasna waxa ay ku gaaraan, in ay si xad dhaaf ah u adeegsadaan in ay dayn hawlahooda ku maalgaliyaan dayntaasi oo wadata dulsaar ka badan ka suuqa (nidaamyada maaliyadda intooda badani way ogol yihiin in dulsaarku yahay kharash ka go'aya dakhliga), inay ka qooyaan kharashaadka maamulka iyo xafiiska/xarunta dhexe oo

aad u fara badan, iyo/ama kharashaadka la talinta iyo alaabada oo ka sareeya kuwa suuqa oo lagaga soo qaato laamaha shirkadda xiriirka la leh. Dawladda martigalinta lihi way awooddaa waana in ay iska ilaaliso in si xad gudub ah loo adeegsado qiimaha ay shirkaddu wax ugu gudbinayso laamaheeda kale. Waxa ay qaadi kartaa dhawr talaabo si ay sidaas u yeesho: kow waa in ay soo dajiso sharci iyo nidaamyo yeelaya sida tan: dib-u-habayn lagu xaqiijinayo in quumayntu ahaato mid madaxbanaan; in la dabaqo tusmada/tilmaamaha OECD ee khuseeya qiimaha isku-gudbinta; iyo in uu maalgaliyuhu qoraal ku xuso habka uu ku qo'aansaday qiimaha isku-gudbinta ee uu adeegsaday.

Dayriddu waa hab la xidhiidha cashuurta kharashaadka mashaariicda kala duwan ee ka jira meel shirkadi ay ka hawlgasho. Dayriddu waa habka kala soocidda kharashaadka taas oo looga dan leeyahay gaaridda ujeedooyin la xidhiidha cashuurta iyo daboolidda kharashka, tusaale ahaan waa in kharashaadka mashruuc gaar ahi leeyahay aan lagu darin dakhliga mashruuc kale. Tani faa'iidooyin dhawr ah ayay leedahay. Ta ugu muhiimsani waa iyada oo ka hortagta cashuurta dib loo dhigayo ama la iska leexiyo ee ka iman karta hadii isku darka mashaariicda la ogolaado. Waxa ay sidoo kale yaraysaa culayska maamul ee iman kara haddii wadanku uu leeyahay nidaamyo cashuureed oo faro badan. Ugu dambaynta, waxa ay u sintaa meesha laga hawlgalyo cid kasta oo rabta inay soo gasho/ka shaqayso kuwaas oo aan dhib ku qabi doonin inay hawl bilaabaan marka la fiiriyo kuwii hore uga sii hawl-gali jiray ee hadda wada hawlgallo dakhli soo saaraya. In kast oo habka dayriddu uu yahay hab aad ugu caan ah nidaamyada maaliyadda ee shidaalka, dalalka qaarkood ayaa wali doorta in ay isku daraan mashaariicda cashuurta awgeed. Tan oo kale waxa ay dhacdaa marka uu dalku aad u danaynayo in uu gaaro sahamin iyo waxsoosaar dagdag ah. Isku darku markaa waxa uu dardargalinayaa hawlahaasi, in kasta oo ay jiri karto kharash badan oo ka iman kara dib-dhigidda dakhliga dawladdu.

Waxa adduunka caan ka noqday baahida iyo rabitaanka Sharci waafaqsan in la nadiifiyo dibna loo hagaajiyo goobta shaqada marka ay joogsadaan hawlgalada waxsoosaarka ceelasha saliiddu. Hadaba marka la qeexo, haba yaraatee ma jirto wax dakhli ah oo diyaar ah oo lagu dabooli karo kharashaadkaas la galayo markay joogsadaan hawlgaladu. Maadaama oo ay kharashaadkaasina noqon karaan kuwo aad u badan, maalgaliyayaashu waxay rabaan in ay hore u sii diyaarsadaan hab u ogolaanaya in ay daboolaan kharashaadka kaga baxaya joojinta hawlaha mustaqbalka. Dhaqamada isa soo tarayaana waxay soo kordhiyeen laba xal. Ka hore waxa uu ogolaanayaa lacagta lasii bixiyo ee loogu talo galay kharashaadka la filayo mustaqbalka in la dhigo sanduuq damaanad ah oo laga soo saari daano marka hawl-galadu joogsadaan. Kharashaadkaasi waxay noqonayaan kuwo ka go'aya dakhliga kadibna waxa ay daboolayaan kharashka. Xalka labaad waxa uu ogolaanayaa in hadda dakhliga loo jaro in lagu daboolo kharashaadka la gali doono markay hawlgaladu joogsadaan, laakiin halkii laga dhigi lahaa lacagta sanduuq damaanad ah, ayaa maalgaliyuhu uu siinayaa dawladda damaanad macquul ah oo sheegaysa in mustaqbalka uu isagu kharashaadkaasi dusha u ridan doono.

Reebidda Cashuurta iyo Heshiisyada laba-jeer cashuur qaadida khuseeya. Reebibdda cashuurtu waxa ay khusaysaa dakhliga laga helo dalka marti-galinta iska leh ee ay qaataan dadka aan dalkaasi degaanka u ahayni. Cashuurtu waxa ay noqonaysaa in ka mid ah boqolkiiba inta uu qofku qaadanayo, sidoo kalana waxa ay galaysaa cabirka meeshii cashuurta dhabta ah ee dakhliga qofku gali lahayd taas oo adag in la gaadho sababuna ay tahay daganaasho la'aanta dalka ee qofka cashuurtan bixnaya. Cashuurta la reebo waxa laga qaadaa lacagaha la siiyo dadka qandaraas hoose haysta, bixinta dulsaarka daymaha qalaad, ama/iyo saamiyada macaasha ee dibadaha loo dirayo. Cashuurta laga reebayo badanka waa la dhimaa, marmar si wayn ayaaba loo yareeyaa, sababtuna waxay tahay heshiiska dalka ka jira ee khuseeya Cashuur Laba-jeer Qaadka (DTAs) kaas oo ka dhexeeya dalaka iyo ka ay ka soo jeedaan dadka helaya saamiga macaashkaasi. Tani waa muhiim sababta oo ah waxay cashuurta la reebo maalgaliyayaashu u arkaan qayb ka mid ah culayska cashuuraha badan ee hawlahooda ku dhacaya. Haddii cashuurta la reebo la dhimo iyadoo la adeegsanayo heshiiska DTA, waa in laga fikiro in isbadal u dhigma lagu sameeyo heshiiyada maaliyadeed ee kale. Ugu yaraan arintani waxa ay keenaysaa in ay si dhaw u wada xidhiidhaan cidda masuulka ka ah nidaamka maaliyadda shidaalka iyo cidda kale ee gorgortanka ugu jirta Heshiiska Cashuur Laba-jeer Qaadka (DTAs).

Cashuuraha ku dhaca Xawaaladda/gudbinta Dulsaarka. Wareejinta/Gudbinta ama iibinta liisamada dulsaarka ahi waxay dhiiri galin kartaa horumar wanaagsan taas oo gacanta ka galinaysa hawlaha cidda maalgalinta iyo hirgalintoodaba ugu wanaagsan. Hase yeeshee, waxa uu helo iibiyuhu xiliyada qiimaha saliiddu ay sarayso ayaa noqon kara wax aad u badan taas oo si khalad ah ay u arki karaan dalka waxsoosaarka loo samaynayo ama/iyo dadwaynuhuba. Xaaladahan oo kale marka lagu jiro waxaa muhiim

ah in la helo hab cashuuro looga qaado waxay helayaan.

Dhawr nooc oo wareejin/gudbin ah ayaa jira. Marka ay jirto lacag toos ah oo la xawilayo iibsadahu waxa uu iibiyaha kala wareegaa liisanka taas oo u dhiganta kolba inta uu yahay dulsaarka/danaha loo xawilayaa. Marka wareejinta dulsaarku/danuhu ay khusayso badda, iibsaduhu waxa uu saami ka iibsanayaa shirkadda badda ka shaqaynaysa ee ku leh liisanka dalka martigalinaya. Ilaa uu iibsaduhu helayo 100kiiba boqol saamiga looma aqoonsanayo iibsadaha inuu haysto liisanka isagu. Nooc sadexaad oo wareejin/gudbin ah ayaa waxa ay dhacdaa marka iibsaduhu uu ku helo liisanka isku dheeli tirnaan ka jirta bixinta kharashaadka ama shaqo uu iibsaduhu uga qabtay meesha liisanka khuseeyo iibiyaha. Saamaynta cashuurta ay ku yeelanayso xaalad walbaaba waa gaar.

Dhawr arin oo la kala dooran karo ayaa jira. Mid ayaa ah in aan laba cashuurin wareejinta. Waa sida ay Norway yeesho iyada oo qiimaysa in dawladdu ay mustaqbalka ka helaan faa'iido iyaga oo u ogolaanaya in dulsaarka laga helo wareejinta/xawilaadu Norway where the government values the potential efficiency gains through allowing interest transfers more highly than possible revenue gains obtainable by taxing them. Mid kale ayaa ah in la cashuuro iibiyuhu waxa uu qaato oo sidoo kalana loo ogolaado in iibsaduhu qiimaha iibka ka gooyo dakhliga sababo cashuurta la xiriira awgood. Mucaamaladan sinaanshaha wadata, waxa lagaga dhaqmaa Angoola, waxaanay natiijadeedu la mid tahay marka aanay wax cashuur ahi jirin oo kale, in kasta oo ay kaga duwan tahay dardar galinta cashuuraha dakhliga sababta oo ah cashuuraha laga qaado iibka hantida culus isla markiiba waa la qaadaa, laakiin cashuurtii lagu dheeli tiri lahaa dib ayaa loo dhigaa iyada oo la isticmaalayo habka yaraanshaha tayada hantida ee duugowga ka imanaysa. Doorashada sadexaad waxa ay tahay in la cashuuro iibiyaha laakiin laga daayo in wax kale laga gooyo qiimaha iibiyuhu wax ku gadayo. Tani waxa ay carqaladaysaa in uu dhaco wareejin/gudbin wanaagsani. Yugandha ayaa habkan adeegsatay.

In kasta oo la cashuuro xawilaadaha tooska ah, waxa suuro gal ah in dawladdu aanay cashuurin saamiyada dhaqdhaqaaqyada dhaqaale ee ka dhaca badda iyada oo ogsoon caqabadaha sharci ee ay leedahay iyo adkaanshaha baadhitaanka la xidhiidha hantida halkaas laga helo. Taa badalkeedu waxa uu yahay, in ay dawladdu go'aansato in ay u aragto hawlaha ka dhacaya badda sida kuwa shirkadaha kale ee wadanka kadibna ay u cashuurto sidooda oo kale. Arintan dalal dhawr ah ayaa ka baaraa dagaya laakiin wali may fulinin.

Marka wareejinta lagu gaadho habka heshiiska loo yaqaano Farmawt (waa in ay shirkad leh liisan ay la heshiiso mid kale oo ay siiso lahaanshaha qayb ka mid ah kale kagana badalato adeegyo), waxaa laga yaabaa in ay dawladdu u aragto kharashaadkaas aan isku dheeli tirnayn in uu yahay faa'iido la cashuuri karo, laakiin tana wali cid dhaqan galisay ma jirto.

Marka laga hadlayo xadig cashuurto noqonayso, waxa aad ogsoonaataa in marwalba cashuurta wixii laga helo iibka tantida ma guuraanka ahi ay tahay mid ka hoosaysa cashuurta dakhliga shirkadaha taas oo ah in la qiro: (1) suurto galnimada in sixirbarku saameeyo waxa laga helayo/faa'iidada hantida ma-guuraanka ah, kaas oo sababaya in magac ahaan faa'iidada la gaadhay ay u muuqato mid ka badan faa'iidada dhabta ah; iyo (2) faa'iidada dadku ay u arkaan in ay ku jirto wareejinta/xawillidda.

Uhogaansanka cashuuridda faa'iidada hantida maguuraanka ah ayaa noqday mid aad u dhibaato badan. Waxa ay dhawr dal arintan wax kaga qabteen iyaga oo isku diyaariyay in ay dawladdu ansixo wareejinta (waa qodob ka mid ah heshiisyada iyo xeerarka shidaalka) markaas oo uu iibiyuhu bixinayo cashuur.

Xasilinta Maaliyadda. Qodobo heshiis oo la isla ogol yahay in lagu xasiliyo heshiisyada maaliyadda ayaa maalgaliyahu u arkaa maangal, sababtuna waxa ay tahay maalgalinta lacagta badani ku baxday ee uu hore u sii sameynayo, mudada dheer ee ay lacagtu ku soo noqonayso, iyo khatarta siyaasadeed ee la xiriirta sahaminta shidaalka iyo soosaaritaankiisa (eeg qaybta kore ee II).

Qodobada xasilinta loo adeegsanayo waa laba nooc: Nooca loo yaqano "frozen law" oo waxa uu isagu hagaajinayaa qorshaha maaliyadda ee lagu dhaqmayo xiliga la bixiyo qandaraaska ama liisanka ee sanado gaar ah. Nooca kale ee lagu kabaa/magdhabaa waxa uu keenayaa in isbadal kasta oo si xun u saamaynaya maalgaliyaha in loogu magdhabo abaalmarin cusub.

Dhawr arin ayaa ka soo baxaya. Waxa laga yaabaa in nidaamkii ama qorshihii hore in maalgaliyuhu ka heli

jiray faa'iido aan hadda sii soconayn. Sanado badan ka dib, waxa laga yaabaa in ay adkaato in la go'aamiyo ama lagu heshiiyo wixii ku jiray qorshihii hore. Haddii la adeegsanayo nooca kabka/magdhawga ah, waxa suura gal ah in ay adkaato in lagu heshiiyo inta kabka saxda ahi noqonayo. Marka xasilinta la ogol yahay, ma in la adeegsadaa habkaasi kaliya makra ay soo gaarto maalgaliyaha saamayn xuni? Isku dheeli tirnaan la'aantu markay jirto ma waxa weeye in lagu saxo faa'iidada oo laga gooyo maalgaliyaha hadii ay xaaladdu u wanaagsanaato isaga?

Dalalka qaarkood waxa ay adeegsadaan xasilinta, iyaga oo raaciya qiimo kale. Tusaale ahaan, haddii uu ku adkaysto maalgaliyuhu in xasilinta la adeegsado, khidmadda ku habooni waxay noqonaysaa in lagu sii kordhiyo boqolkiiba dhibco kale oo dheeraad ah. Qorshaha maalgalinta qodidda macdanta ee dalka Beeruu offers ayaa habkan dhigaya. Dalal ka kale, way fahansan yihiin doodaha khuseeya xasilinta, iyo waliba culayska ay ku keenayaan duruufuha is badalayaa heshiisyada, taas oo keenaysa in marmarka qaar dib loogu laabto heshiiskii hore loola galay maalgaliyaha. Nidaam maaliyadeed oo adag oo keeni kara in si macquul ah loo wadaago khatarta iyo kirada dhaqaale oo sidoo kalana si toos ah ula jaanqaadi kara duruufaha is badalaya ayaa kordhinaya suurta galnimada in la helo daganaasho/xasilooni maaliyadeed, haba la raaciyo qodobo keenaya xasilin dhab ahe, waxana ay yaraynaysaa culayska ka iman kara in mar walba dib loogu noqdo heshiisyada. Habaka xadiga macaashka la rabo (ROR) ee lagu soo xereeyo kirada ee hore loogaga soo halday qaybta IV ee jabtarkan/cutubkan ayaa tusaale u ah nidaamkaasi.

Isbadalada badan ee ku yimi waaxda shidaalka ayaa soo kordhiyay in heshiiyada qodobo xasilinta khuseeya lagu daro. Farsamooyinka wanaagsan ee lagu dhaqmo ee hadda soo baxay ayaa talo dhawr ah inaga siinaya xaaladaha qodobada xasilinta la adeegsado. Damaanadaha xasilinta waa in ay waqti ku xidhnaadaan. Meelaha ay khuseeyaanna waaa inay yeeshaan xuduud, sida, in ay qaabilsanaadaan kaliya qodobada soo hoos galya xeerarka soo celinta raasamaalka, xadiga cashuuraha dakhliga iyo kuwa kale ee la reebo/xejiyo, xadiga khidmadda, iyo xadiga ugu badan ee uu noqonayo cashuurta soo dajintu. Ma aha in lagu daro wax ka badalid lagu sameeyo xeerarka cashuurta ee si guud u saamaynaya, tusaale ahaan, kuwa aan shidaalka gaar u takoorayn shidaalka. Isbadallo ku yimaadda shuruucda deegaanka ama caafimaadka iyo nabadgalyada ayaa ka mid ah.

VIII. Soo koobid iyo gunaanadka

Dalalka shidaalka rajaynaya ama hadaba soo saara dhexdooda, nidaamyada maaliyaddu waxa ay si isku mid ah muhiimad wayn ugu leeyihin dawladaha shidaalka leh iyo maalgaliyayaasha.

Waxa ay waaxda shidaalku leedahay astaamo gaar ah oo u baah in la tixgaliyo marka la qorshaynayo nidaam maaliyadeed. Wax aka mid ah, kala soocid la'aanta, maalgalinta badan ee ay u baahantahay, waqtiga badan ee raasamaalku ku soo noqonayo, iyo khatarta siyaasadeed ee ay leedahay.

Marka hore ee la qorshaynayo nidaamka maaliyadda ama dib loo eegayo waa in maskaxda lagu hayaa ahdaafta nidaamka ee ay ka mid yihiin: in kor loo qaado waxsoosaar wanaagsan iyo horumar fiican oo uu gaadho waxdaado oo dhamo; in ay dawladdu ka hesho shidaalka dakhli balaadhan oo sii kordhaya; in uu abaalmariyo yaraynta kharashka; dakhli hore loo heli karo oo laguna kalsoonaan karo; in khatarta si macquul ah loo maareeyo; in lala tartami karo dalalka caalamka; iyo in uu maamulku noqdo mid fudud. Marwalba islama jaanqaadaan ujeedooyinka dawladda iyo kuwa maalgaliyuhu laakiin nidaam is fiican loo qorsheeyay waxa uu wax badan ka qaban karaa in uu danooda isku dheeli tiro.

Ujeedooyinka maaliyadeed ee kala duwani waxa ay u baahan yihiin nidaamyo kala duwan in la adeegsado. Hababka ku salaysan macaashu waxay ku wanaasan yihiin dhiiri-galinta horumar wanaagan oo sal-balaadhan in la gaaro, laakiin waxa loo arkaa dib-u-noqod marka laga hadlayo xiliga la helayo dakhliga iyo sidoo kale fudaydaynta maamulka. Khidmaduhu waxay keenaan dakhli xili hore soo xerooda waxana loo arkaa in ay fududahay maamulkoodu (in kasta oo ay carqaladu ku iman karto). Laakiin saamayn ma wanaagsana saamayntooduna waa dib-u-dhac halkii ay ka ahaan lahayd hor-u-socod iyo korodh. Habaka kirada lagu soo xereeyo ee dabacsan aad ayaa loo adeegsadaa laakiin wax ku oolnimadoodu aad ayay u kala duwan tahay. Habaka ku xidha qaybta ay qaadanayso inta uu macaash dhab ah helayo maalgaliyuhu ayaa ah hab uu isticmaalkiisu soo kordhayo oo rajyo wanaya laga qabo. Ka qayb-galidda ay dawladdu hawlgalada ka qayb-galayso ayaa isna caan ah. Waxa uu badankana leeyahay saamayn maaliyadeed oo ay tahay in la aqoonsado.

Ma jiro dal si gaar ah ugu tiirsan nidaam maaliyadeed. Waxa caado ah in laysku daro dhawr nidaam (bushqad). Labada ugu caansani waa isku darka habka cashuurta/khidmadda iyo habka wadaagga waxsoosaarka. Lanadan nooc midkood ayaa laga yaabaa in uu ku jiro nooc ka mid ah ka qayb-qaadasho dawladeed. Laakiin ma aha magac ka mid ah tirade nidaamyada ah ee la tirsado. Habka cashuurta/khidmadda iyo habka wadaagga waxsoosaarka waxa loo qorshayn karaa si ay u soo baxaan natiijooyin maaliyadeed oo isku dhigma. Waa faahfaahinta waxa ay ka kooban tahay bushqadu iyo qiyaasaha qiimaynta ee la doortay kaas oo go'aamin kara in uu si fiican u shaqaynayo marka la barbar dhigo ujeedooyinka maaliyadda iyo in kale.

Dalalka shidaalka leh ama kuwa soosaara ayaa waxa aad loogu dhiirigaliyaa in ay kobciyaan awoodda qiimaynta nidaamkooda maaliyadeed. Si ay u hirgaiyaan arintan waa inay adeegsadaan la taliyayaal ama iyagu dalka gudihiisa waa in ay ka abuuraan tayadii ay hawshaa ku hirgalin lahaayeen. Awoodaasi waxa ay muhiim u tahay arimo dhawr ah: in marka hore la qorsheeyo nidaamka; bixinta liisanka iyo gorgortanka; qiyaasaha dabaqalka; qorshaynta waaxda iyo dhaqaalaha guud. Iskaashiga u dhexeeya laamaha/hay'adaha iyo sida loo helayo macluumaad lagu kalsoonaan karo ayaa arintaasi inay guulaysato muhiim u ah.

Run ahaan hawlaha qorshaynta iyo maaraynta nidaamka maaliyadda shidaalku waa hawlo culus. Qaybaha kor ku xusan ayaa ka bixiyay fikiro guud waxa la xiriira. Qaybta kor u soo xigta, qayta VII waxa macnaheedu yahay in ay dareen xul ah ka bixiso culayska ka iman kara hadii la sii galo baadhintaan aad u faahfaahsan: go'aaminta qiimayaasha maaliyadeed; arimaha ka soo baxa daboolida kharashka (qiimaha gudbinta/xawaaladda, dayridda, habka loola dhaqamo kharashaadka shaqo joojinta); haynta cashuuraha iyo heshiisyada laba goor cashuur qaadidda; iyo xasilinta maaliyadda.

Copyright © 2015
Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunka

1818 H Street, NW
Washington, DC 20433
Telephone: 202-473-1000
Internet: www.worldbank.org

Qoraallada Bangiga Adduunka waxa loo soo daabacaa sidii natiijooyinka Bangigu uu ka gaadhay hawlihiisa loola wadaagi lahaa bahda horumara sida ugu dhakhsaha badan. Hadaba qoraalka maqaalkan laguma soo diyaarin hab waafaqsan nidaamka saxda ah ee loo maro qoraalada sida rasmiga ah loo saxay/tafatiray. Ilaha la soo xigtay ee qoraalka waxa laga yaabaa in ay yihiin qoraallo aan rasmi ahayn oo aan si toos ah loo heli karaynin. Qoraalkan waxa soo saaray shaqaalaha ama la taliyayaasha Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunka. Waxa ay heleen, sida ay u fasireen, iyo gunaanadka lagu xusay qoraalkani kama turjumayo fikirka Agaasimayaasha Fulinta ee Bangiga Aduunka aa dawlahada Bangigu uu matalo. Waxa ay gabi ahaanba yihiin fikirka qoraaga mana ah in sinaba loogu nisbeeyo Bangiga Adduunka, ama hay'adaha la xidhiidha, ama xubnaha gudida agaasinka fulinta ee dalalka ay matalaan.
Bangiga Adduunku ma damaanad qaadayo saxsanaanta xogta ku jirta qoraalkan mana qaadanayo masuuliyadda caqaaqib kasta oo kal dhalata isticmaalkiisa. Xuduudaha, midabyada, diimaha, ama xog kale oo lagu muujiyo khariirad kasta oo qoraalkan ku jirtaa ma sheegayso go'aanka Kooxda Bangiga Adduunka ee xaaladda sharcinimo ee dhul kasta ama ansixinta ogolaanshaha xuduudahaasi.

Xuquuqaha iyo Ogolaanshaha

Qoraalka maqaalkan ku jiraa wuu xafidan yahay. In min-guuriyo iyo/ama in qayb ka mid ah ama dhamaan qoraalkan la naqilo/raro iyada oo aan ogolaansh loo helin waxa ay noqon kartaa xadgudub sharciga arintaasi khusayso. Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunku waxa uu dhiiri galiyaa baahinta shaqooyinka uu qabto waxana uu u siin doonaa ogolaansho in dib loo isticmaalo qaybo ka mid ah qoraalkan sida ugu dhakhsaha badan.

Waydiimaha xuquuqaha iyo rukhsadaha khuseeya, ee ay ka miy yihiin xuquuqaha qiima dhimista, waa in lagu aadiyaa Xafiiska cidda soo Daabacday ee, Bangiga Adduunka, 1818 H Street NW, Washington, DC 20433, USA; fax: 202-522-2422; e-mail: pubrights@worldbank.org.